

## **Baaritaanka kaadidhaysta ilmaha oo lagu sameeyo raajo qaadis loo adeegsado maaddo si fiican u soo saarta barta la sawiraayo, ee isbitaalka cusub ee carruurta**

### **Lapsen virtsarakon varjoainekuvaus Uudessa lastensairaalassa**

Baaritaanka kaadidhaysta ilmaha ee lagu sameeyo raajo qaadista loo adeegsado maaddada sida fiican u soo saaraysa barta la sawiraayo, waxaa lagubaarayaa tusaale ahaan shaqada iyo qaabdhismedka kaadidhaysta iyo kaadimareenka.

Intabaaritaanku socdo waxaa la sawirayaa agagaarka miskaha, iyadoo la adeegsanaayo qalabka raajada.

Baaritaankaan waxaa sidoo kale lagu magacaabaa (miktiokystografi).

Fadlan waxaadbaaritaanka ugu soo talaggashaa wakhti dhan illaa 2 saacadood. Sida badanbaaritaanku wuxuu qaataa 30–60 daqiqiyo.

Ilmaha u baahanbaaritaanka degdegga ah waxaa laga yaabaa inbaaritaanka lagu sameeyo kahorilmahaaga.

Waraqdda hagista ama tilmaanbixinta ee imaanshaha waxaa ku qoran dhammaan macluumaadka ku saabsan halkii Aad la soo xiriiri lahayd, haddii Aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsanbaaritaanka.

### **Baaritaanka kahor**

Si looga hortago in ilmuu uu qaado caabuqa kaadimareenka, dhakhtarka ilmaha daryeelaya ee soosoray warqadda diristabaaritaanka ayaa ilmaha u qoraaya daawo antibiyootig ahbaaritaanka kahor.

Dhakhtarka ilmaha daryeelaya ayaa sidoo kale ku siinaaya hagisama tilmaanbixin ku saabsan sida daawada loo qaato.

Haddii aadan helin hagistaama tilmaanbixinta ku saabsandaawada, waxaad maalinkaabritaanka ka horreyya soo wacdaa waaxdaama qaybtabaaritaanka u soodirtayilmahaaga

Haddii Ilmahaagu uu qaato daawo antibiyootig joogto ah oo looga hortagaayo caabuqa kaadimareenka, taasoo loola jeedo daawada kahortagga (estolääkitys), u sii daawada sidii caadiga ahayd.

**Laga bilaabo subaxnimada maalinka baaritaanka,** laba goor maalinkii, subaxdii iyo fiidkii.

- subaxdii iyo fiidkii, wadarta guud muddo saddex maalmood ah, taasoo loola jeedo maalinka baaritaanka iyo laba maalmood oo ka dambeeya baaritaanka.

Qiyaasta daawada ee subaxdii iyo qiyaasta fiidkii, waa isla qiyaastii hore loo siin jiray.

**Waxaa muhiim ah,** in ilmuu uu qaatay antibiyootiga subaxnimada maalinka baaritaanka.

Haddii aan ilmaha la siinin daawada, baaritaanka lama samayn karo.

### **Inta lagu guda jiro Baaritaanka**

Inta uu baaritaanku socdo waxaa ilmaha la seexinaya miiska baaritaanka.

Dhakhtarku wuxuu ilmaha gelinaya tuubo dhuuban oo loo yaqaan kaatiitar, taasoo iyadoo loo maraayo kaadimareenka la gaarsiin doono illaa kaadihaysta. Marka la gelinaayo kaatiitarka waxaa la isticmaalaa jeel ama kareem kabuubyayo leh oo fududeynaaya katiitar gelinta kaadihaysta.

Iyadoo loo marinaayo dhanka katiitarka ayaa waxaa kaadihaysta laga buuxinaya maaddo si fiican u soo saarta barta la sawiraayo (varjoaine). Dhakhtarku wuxuu qaadayaa sawirro raajo ah inta lagu jiro buuxinta kaadihaysta iyo marka ilmuu kaadinaayo.

Marka sawir qaadistu dhammaato, katiitarka waa laga saarayaa.

### **Baaritaanka kaddib**

Dhakhtarka ilmahaaga daryeelaya ayaad ka heli doontaa jawaabaha baaritaanka.

Haddii aadan garanayn sida aad u heli karto jawaabaha, weydii qaybta ama waaxda u soo dirtay ilmaha in baaritaanka lagu sameeyo.

Dhakhtarka daryeelaya ilmaha waxaa uu sidoo kale ku siinaya hagista ama tilmaanbixinta ku saabsan haddii loo baahdo in daawada antibiyootiga ah ah la sii wado.

### **Waxyabaha kale ee muhiimka ah**

Hore u soo qaad kaarka Kela-da ama kaarka aqoonsiga ee ilmaha.

Hal qof oo weyn ayaa ilmaha la joogi kara inta baaritaanka lagu guda jiro. Haweeneyda uurka leh ama looga shakisan yahay in ay uur leedahay ma geli karto qolka sawirka.

Ma jirto wax kharash gooni ah oo ka imanaaya dhanka baaritaanka.

Haddii aadan iman karin, fadlan iska baaji ama iska kansal wakhtiga ballanta.